

Warbixinta RHCP ee COVID-19

Warbixinta Xaalada (ee **May 6, 2020**)

Olmsted County: 322 **kiisas**

Minnesota: 8,579 **kiisas**

United States: 1,171,510 **kiisas**

(Tixraac: Waaxda Caafimaadka MN, CDC)

Jooji Fiditaanka

Istacmaal marada daboolka wejiga markaad dhaxjoogtid goobaha dadweynaha.

Dabool qufacaada ama hindhishadaada.

Ku dhaq gacmahaaga biyo iyo saabuun ama isticmaal gacmo nadiifiye badanaa.

Ilaali kala fogaanshahaada **bulshada – Ka fogow 6 cagood.**

Guriga joog iyo keli-ahow, haddii aad caafimaad **darro** dareento.

Iska baar COVID-19, haddii aadan caafimaad qabin.

Su'aalahaada waa Laga Jawaabay

1. Baaritaankeyga COVID-19 wuxuu noqday togan (positive), maxaan sameeyaa hadda?

Baaritaanka togan (**positive**) ee SARS coronavirus-2 PCR (oo **ah swab**) **macnaheedu waa inaad qabto** COVID-19. Waxaa kula soo xiriiri doona **daryeelbixiye ku siin doonaa talooyink** ku saabsan waxaad u baahan tahay inaad sameyso.

Adiga: Kali ahaanshaha

- Waa inaad sii wadaa la socoshada astaamahaaga oo ay ku jiraan neefsashada oo yaraata, feero xanuun, qufac, qandho, dawakh, wareer, matag iyo shuban.
- Waa muhiim inaad guriga joogto oo aad iska ilaaliso inaad la xiriirto dadka kale marka laga reebo inaad u baahan tahay daryeel caafimaad mooyee. In alla intii suurtagal ah, waa inaad joogto qol gaar ah kana fogaato dadka kale ee gurigaaga oo aad isticmaasho musqul gaar ah, haddii ay jirto.
- Waxaad ubaahantahay inaad xirato maaskaro marka aad dadka kale la joogto, iskana ilaali inaad la wadaagto alaabada guriga.
- Nadiifi isla markaasna isticmaal jermiska-dile waxyaabaha taabashada sare leh iyo sagxadaha ugu yaraan hal mar maalintii.
- COVID-19 waa cudur la-garan karo. Waxaa kula soo xiriiri doona wareyste kiis Olmsted County ama kalkaalisada caafimaadka bulshada kaasoo go'aan ka gaari doona haddii aad uga baahan tahay caawimaad xagga adeegyada muhiimka ah, sida cuntada, gaadiidka, guryeynta iyo kaalmooyinka kale. Waxa kale oo aad la xiriiri kartaa COVID-19 khadka tooska ah ee bulshada ee (507) 328-2822 ama covidcases@co.olmsted.mn.us
- Shaqaalaha Caafimaadka Bulshada ayaa diyaar u ah inay ku caawiyaan, hadba sida loogu baahdo.

Haddii aad calaamadaha digniinta degdegga ah ee COVID-19 yeelato, isla markiiba hel daryeel caafimaad. Calaamadaha digniinta degdegga waxaa ka mid ah: neefsashada oo dhib ah, xanuun joogto ah ama cadaadis feeraha ku dhaca, jahwareer cusub ama awood darro aan la toosi karin, bushimaha jilicsan ama wajiga..

Wac 911 haddii aad qabtid xaalad caafimaad oo degdeg ah. Haddii aad qabtid xaalad caafimaad oo degdeg ah oo aad u baahan tahay inaad wacdid 911, u sheeg hawl wadeenka inaad qabto ama aad u

maleyneyso inaad qabi karto COVID-19. Haddii ay suurtagal tahay, gasho marada wajiga ka hor inta uusan gargaarka caafimaadka imaan.

Loogu talagalay dadka ku nool gurigaaga

- Waa inaad ogeysiisaa in baaritaankaada cudurka COVID-19 uu noqday togan (positive).
 - Dadkani waa inay ka fogaadaan inay kula soo xiriiraan.
 - Sababta oo ah dadka uu ku dhaco cudurka COVID-19 laga yaabo inay u gudbiyaan cudurka inta aysan soo bixin calaamadaha, dadka ku nool gurigaaga waa inay joogaan guriga oo ay ka fogaadaan inay la xiriiraan dadka kale 14 maalmood.
 - Haddii dadka ku nool gurigaaga ay yeeshaan astaamo, waa inay tagaan Xarunta Caafimaadka ee Waqooyi-galbeed COVID-19 si looga baaro COVID-19. Baaritaanku waa lacah la'aan.
 - Hadday xanuun dareemaan, waa inay la xiriiraan daryeel caafimaad bixiyaha. Waxay sidoo kale toos ugu sheegi karaan qolka gargaarka degdegga ah haddii ay qabaan astaamo daran.
 - Haddii qof kasta oo guriga jooga uu is-difaaciisa qaldamo ama uu leeyahay xaalado caafimaad oo aad u hooseeya, waa inuu la xiriiraa bixiyaha daryeelkooda si ay ugu sheegaan inay xiriir dhow la yeesheen COVID-19.
 - Qof qoyska ka tirsan oo shaqeeya waa inuusan shaqo tagin, waana inuu wacaa caafimaadka shaqada ama xafiiska shaqaalaha si loo go'aamiyo goorta ay ku noqon doonaan shaqada.
2. Waxaa baaritaankayga COVID-19 uu noqday diidmo (negative). Maxaan sameeyaa hadda?

- Haddii aad leedahay diidmo SARS coronavirus-2 PCR test, micnaheedu waa inaad qabin COVID-19 waqtiga baaritaanka la qabtay. Si kastaba ha noqotee, tan micnaheedu maahan inaad jiran doonin.
- Waa inaad wali qaadataa talaabooyin ka hortagga ah si aad naftaada iyo dadka kale u badbaadiso. Waxaad tan u sameyneysaa adigoo iska ilaalinaya inaad qaado fayraska iyo inaad joojiso fiditaanka fayraska.
 - Ku dhaq gacmahaaga biyo iyo saabuun ama isticmaal gacmo nadiifiye badanaa.
 - Ilaali fogeyn jireed: joog ugu yaraan 6 cagood ama 2 mitir marka laga reebo dadka kale ee aan ahayn reerkaaga.
 - Istacmaal marada daboolka wejiga markaad dhaxjoogtid goobaha dadweynaha.
 - Haddii aad ku sugan tahay goob gaar ah oo aadan ku xirneyn marada wejigaaga daboolka, xusuusnow inaad had iyo jeer ku daboosho afkaaga iyo sanakaaga warqada tirtirashada markaad qufacdo ama hindhisto ama gudaha xusulkaaga.
 - Nadiifi isla markaasna siticmaal jermis-dile sagxadaha meelaha sida caadiga ah loo taabto sida miisaska, gacanta albaabada, wareegga nalka, miisaska sare, gacmaha furitaanka, taleefannada, batoonada, musqulaha, tubooyinka biyaha, iyo saxanka musqulaha, maalin walba.

Khadka tooska ah ee bulshada COVID-19

(507) 328-2822

9 am - 9 pm, 7 maalmood/usbuucii

Adiga, dadka bulshada ka tirsan, waxaad safka hore ugu jirtaan joojinta COVID-19. Adeegso nadaafadda gacanta, nadiifinta iyo fayadhowrka. Kala fogeynta bulshada. guri jooga. Kulligeenna arrintan waan ku wada jirnaa. Annagoo mid ah ayaan bogsan doona

